

Xuunka



Xuunka waxaa lagu gartaa midabkiisa madawga iyo jaallaha (huruud) isku jirka ah. Waxa kale oo lagu gartaa micidiisa oo uu Kaga duwanyahay shinnida, kaasi oo wax badan ku qaniini kara. Waxa kale oo uu xuunku kaga duwanyahay shinnida deegaankiisa Oo ah "bulshada".

Bisha 4 aad (April) badhtamaheeda waxa banaanka usoo baxda Boqoradda xuunka, iyada oo raadineysa xero cusub meel ay ka dhisato Xerada boqoraddu waa goobaabsantahay, oo ma weyna .xerada boqoraddu waxay ka koobantahay 10-20 unug .Unug walba guntiisa waxa ay boqoraddu dhigta hal ukun ah. Marka ay ukuntu baad dilaacsato bisha 5 aad (Maj) waxay boqoraddu mashquul ku noqotaa Korsiiinta dhasheeda. Bisha 5 aad (Maj) dhamaadkeeda waxa banaanka usoo baxa xuunkii yaryaraa oo kobcay si ay u tarmaan isla markaasna Boqoraddu hawsheeda ay sii wadato taasi oo ah iney ukumo kale dhigto oo taranka xuunku sii socdo. Muddada ah bisha 4 (April) ilaa iyo bisha 6 aad (Juni) hawsha kaligeed waxa qabata boqoradda.

Wakhtiga uu xuunku mashaakil weyn bulshadu kala daristo waa bisha 7 aad (Juli) ilaa iyo ta 8 aad (Augusti).

Xilliga ay deyrtu bilow tahay waxay boqoraddu bilowdaa inay boqoraddu dhigto xeradeeda ukumo cusub kuwaas oo noqon doona Boqorado cusub iyo xuun lab ah. Xuunkaas labka ah waxay iskumar Dhintaan boqoraddii ay ka tafiirmeen iyo wixii ay iyadu dhashey oo idil. Xilliga guga ee danbe waxaa banaanka usoo baxda boqorad cusub oo hawsha halkaas kasii wadda. Swiidhan waxa uu xuunku xeradiisa isticmaalaa muuddo gaadheysa hal sanno kadibna wuu ka guura.

Marka la gaadho xilliga bisha 4 aad ilaa iyo bisha 6 aad xerada xuunka waxaad iskaga qaadi kartaa ul yar ood tuuri kartaa si uu xuunku kaaga tago. Marka la gaadho xilliga jilaalka waxa uu xuunku (14 nooc oo kala duwan ayaa jira swiidhan) ka sameystaa xeradiisa dhulka hoostiisa waxay dadku ugu yeedhaan "xuunka-dhulka".

Xuunka nooca ka dhista xeradiisa dhulka hoostiisa waxa loo yaqaan "xuunka-dhulka". Noocyada wadankan jooga 3 nooc oo xuun ah ayaa ka dhista xero carrada hosteeda. Haddii aad ka shakido ina xuun gurigaaga oo ka sameystey xero dhulka hoostiisa waxaad fiirisaa ina Uu ka sameystey dhawr irridood oo laga galo. Xuunku waxa uu samaystaa hal irrid oo kaliya isaga oo kaga duwan cayayaan kale oo iyagu samaysta dhawr irridood. Cayayaankaas oo aan ahayn kuwo mashaakil kuu keenaya.

OGSOONNOOW waxa jira cayayaan u eeg xuunka oon ahayn khatar Waxaa ka mid ah diqsigu ubaxa, iyo nooc minal balaanbalis oo sawaabisa xuunka. Waxa jira nooc kale oo xuun ah oo loo naaneyso xuunka takooran oo isagna banaanka usoo baxa wakhtiyada xagaagu bilowga yahay. Xuunkaas ha ku qaldin boqoradda oo iyadu kaligeed hawl gasha xilligaas. Xuunka iyo shinniduba waxa weeyi xayawaan muhimmad u leh dhirta iyo ubaxa sidaas awgeed waxaa mamnuuc ah ina la waxyeeleeyo.